
# Maalgelin Daymeed oo La Codsaday ee Caafimaadka, Badbaadada iyo Casriyeynta








Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) waa kuwo dugsiyada degmo ee ugu weyn Oregon , iyadoo ay ku yaalaan in ka badan 90 goobood oo dugsiyo ah isla markaana ay dhigtaan 48,500 oo arday. Dhismayaasha PPS qiyaas ahaan da'doodu waa 77 sano jir–iyadoo kuwo badan oo ka mid ahi jiraan wax ka badan 100 sano jir.

Dugsiyada da'ada weyn leh waxay u baahan yihiin dacaytir iyo hagaajin si ardayda loo siiyo xarumo waxbarasho oo casri ah iyo si wax looga qabto xaaladaha aan badbaadada ahayn. Baaritaan kiimikada lead lagu sameeyay 2016-kii waxay muujisay in dusgiyada intooda badan ay leeyihiin tuubada biyaha qabow qaada oo baaritaankii la sameeyay lagu ogaaday in ay leedahay qiyaas ka saraysa heerarka tallaabada ee EPA. Kuwo badan oo ka mid ah saqafyada ayaa dhaafay wakhtigii ay waxtarka yeelan lahaayeen, iyagoo qaarka mid ah ay si joogta ah biyuhu uga soo daataan. Gambaleelka badbaadada ee dabka sheega iyo nidaamyada biyaha wax lagu rusheeyo ee dugsigu waa kuwo aanan ku filnayn.

PPS waxay ansixisay Qorshaha Muqtaqbalka Dheer oo Xarumaha loogu talagalay si loo casriyeeyo isla markaana loo kordhiyo dugsiyada iyadoo la adeegsanayo lacago deyn ah oo lagu maalgelinayo dhismaha. 2012-kii, cod bixiyayaashu waxay oggolaadeen $482 malyuun oo maalgelin daymeed ah, oo lagu kharash garaynayo:

- Casriyeynta Dugsiyada Sare ee Franklin, Grant, iyo Roosevelt High Schools, iyo Faubion PreK-8;
- Mashaariicda 52 dugsi oo dheeraad ah–dib u cusboonaysiinta fasallada sayniska, saqafyo cusub, wanaajinta soo gelitaanka dhismaha iyo wanaajinta waxyaalaha dhul gariirka loogu talagalay; iyo
- Qorshaynta dib u cusboonaysiinta dhammaan dugsiyada sare.

2017-ka, PPS waxay kulan u qabatay Kooxda Tala Bixinta ee Saamilayda Maalgelinta Daymeed (BSAG) si ay u qiimeeyaan baahida loo qabo maalgelinta daymeed ee la codsaday ee soo socota, ee loo qorsheeyay in cod bixin loo qaado Maajo 16, 2017-ka. Talada ay soo jeediyeen BSAG , iyo fikradda bulshadu qabto waxay tilmaantay, in maalgelinta daymeed ee la codsaday, haddii la ansixiyo, lagu kharash garayn doono casriyeynta Dugsiyada Sare ee Benson, Lincoln, iyo Madison iyo Dugsiga Dhexe ee Kellogg, iyadoo ugu yaraan $150 malyuun loo isticmaalayo mashaariicda caafimaadka iyo badbaadada ee dugsiyada ku baahsan degmada.

## Haddii la ansixiyo, maxay maalgelinta daymeed ee la codsaday qabanaysaa?

Maalgelinta daymeed ee la codsaday ee dhan $790,000,000 waxaa lagu kharash garayn doonaa dib u cusboonaysiinta iyo waxyaalaha lagu kordhinayo dugsiyada sare ee Benson iyo Madison, iyo dib u dhiska buuxa ee Dugsiga Sare ee Lincoln iyo Dugsiga Dhexe ee Kellog. Qiyaastii boqolkiiba 30 oo ka mid ah mashaariicdani waxay si buuxda wax uga qabanayaan arrimaha la xiriira caafimaadka iyo badbaadada, oo ay ka mid yiihiin yaraynta kiimikada lead iyo maadada asbestos, dayactirka saqafka, cusboonaysiinta waxyaalaha dhul gariirka loogu talagalay, iyo wanaajinta soo gelitaanka dhismaha iyadoo la raacayo Xeerka Naafada Maraykanka. Haddii la oggolaado, maalgelinta daymeed ee la codsaday ee Maajo waxaa sidoo kale lagu kharash garayn doonaa qorshaynta hagaajinta Dugsiyada Sare ee Cleveland, Jefferson, iyo Wilson.

Intaasi waxaa dheer, haddii maalgelinta daymeed la ansixiyo, ugu yaraan $150 malyuun waxaa lagu kharash garayn doonaa mashaariicda caafimaadka iyo badbaadada ee guud ahaan degmada, oo ay ka mid yihiin:

- Bedelaada tuubooyinka duuga ah iyo qaybaha kala ee ay tuubadu ka kooban tahay, si loo yareeyo kiimikada lead iyo si loo kordhiyo tayada biyaha si loo yareeyo baahida loo qabo biyaha sifaysan;
- Meesha ka saarida ama meel ku xirida rinjiga kiimikada lead ka samaysan iyo maadada asbestos;
- Hagaajinta gambaleelka badbaadada ee dabka sheega iyo/ ama nidaamyada biyaha wax lagu rusheeyo;
- Dayactirka ama bedelaada saqafyada dugsiga ee biyaha soo daadinaya ama xaalkoodu sii xumaanayo;
- Wanaajinta soo gelitaanka dugsiga ee dadka naafada ah;
- Wanaajinta aasaaska dhismaha iyo hawo ku furida si loo yareeyo heerarka kiimikada radon; iyo
- Xoojinta badbaadada iyo ammaanka dugsiga.

Haddii xeerka la oggolaado, PPS waxay heli doontaa $8 malyuun oo ah dhaqaale u dhigma lacagta gobolka, lacagta waxay noqon doontaa maalgelinta dheeraadka ah oo ku aadan caafimaadka iyo badbaadada. Haddii maalgelinta daymeed ee la codsaday la oggolaan waayo, lacagaha waxaa markaasi la guddoonsiin doonaa degmo kale.

## Haddii la ansixiyo, muxuu noqonayaa kharashka maalgelinta daymeed?

Heerka cashuurta la saaray ee la xiriira maalgelinta daymeed ee la codsaday waxaa lagu qiyaasay $0.68 oo ah $1,000-kii dollarba ee qiimaha la qiimeeyay in ka badan 30 sano. Heerka cashuurta la saaray waxaa lagu qiyaasay in ay noqoto 1.40 oo ah $1,000-kii dollarba afarta sanadood ee u horeysa, iyadoo hoos u dhacaysa wixii intaasi ka dambeeya. Guri lagu qiimeeyay $200,000 qiimaha kharashka ee sanadka ee bilowga ah wuxuu noqon doonaa qiyaastii $280. Iyadoo qiyaasta guud ee kharashku tahay $136 sanadkii. Wadarta lacagta guud ee maalgelinta daymeed ee lagu oggolaaday xeerkani kama badan karo $790 malyuun.

## La xisaabtanka

Iyadoo ay la xiriirto kordhinta maalgelinta lacageed ee 2012-kii, koox muwaadiniin ah oo ka socda bulshada ayaa dib u eegi doona warbixinta saddexdii biloodba marka la sameeyo iyo hanti dhowrka ee sida lacagta maalgelinta daymeed loo kharash gareeyay si loo sameeyo la xisaabtan ku aadan bulshada ilaa dhismaha laga dhamaystirayo.

*Dugsiyada Dadweynaha Portland waa kuwo taageera dadka laga tirada badan yahay iyo shaqo bixiye loo wada siman yahay.*

HEALTH, SAFETY & MODERNIZATION BOND

# Maalgelin Daymeed oo La Codsaday ee Caafimaadka, Badbaadada iyo Casriyeynta: $790 malyuun

## $324 MALYUUN OO LOOGU TALAGALAY CAAFIMAADKA & BADBAADADA






**Qiyaastii boqolkiiba 30% oo ka mid ah miisaaniyadaha loogu talagalay casriyeynta & dib u dhiska waxaa muhiimada la siiyay mashaariicda caafimaadka & badbaadada ee dhammaan qaybaha ay khusayso**

- **Mashaariicda dheeraadka ah ee caafimaadka iyo badbaadada ...................... $150 malyuun**
- **Casriyeynta & waxyaalaha lagu kordhinayo**
  Benson .......................... **$202 malyuun**
  Madison ......................... **$146 malyuun**
- **Dib u dhis buuxa**
  Lincoln.......................... **$187 malyuun**
  Kellogg ......................... **$45 malyuun**
- **Maamulka, Waxyaalaha Dhici Kara Mustaqbalka & Kharashyada Kala duwan ........... $60 malyuun**

## $150 malyuun oo la codsaday kuwaasi oo ah mashaariicda dheeraadka ah ee Caafimaadka & Badbaadada

| NOOCA MASHRUUCA | QADARKA LACAGEED | DUGSIYADA LA MAALGELIYAY |
|---|---|---|
| Tayada biyaha | $28,492,000 | Ilaa iyo 90 |
| Rinjiga kiimikada lead ku salaysan | $16,623,936 | Ilaa iyo 88 |
| Maadada Asbestos | $12,000,000 | Ilaa iyo 48 |
| Kiimikada Radon | $1,126,125 | Ilaa iyo 90 |
| Gambaleelka badbaadada ee dabka sheega iyo/ama nidaamyada biyaha wax lagu rusheeyo | $25,849,990 | Ilaa iyo 16 |
| Saqafyada | $50,907,949 | Ilaa iyo 14 |
| Gelitaanka/ADA | $10,000,000 | Ilaa iyo 9 |
| Nidaamyada badbaadada | $5,000,000 | Ilaa iyo 11 |

**EMAIL: BOND2017@PPS.NET • WEB: WWW.PPS.NET/BOND2017**



